## Xusuus-qorka Waalidka/Drawalka



# 2023-2024

# Macluumaadka Cimilada Xun ee Gaadiidka Guud ee PPS (Baska Weyn) Waddooyinka iyo Joogsiga

**Ku socota:** Waalidiinta ama masuuliinta ardayda ee isticmaala adeegyada basaska

**Ka timid:** Gaadiidka Ardayda PPS

**Ku saabsan**: Macluumaadka waddooyinka barafka ee sanad dugsiyeedka 2023-2024

Dukumeentigani wuxuu sharxayaa sida degmada uga jawaabi doonto cimilada xun iyo sida adeeggaaga baska weyn u saameyn karo barafka ama xaaladaha cimilada kale ee xun. Dukumeentigani waxa kale oo uu bixiyaa macluumaadka ku saabsan PPS fariimaha warbaahinta cimilada xun iyo hababka jawaabta gaarka.

Dhammaan dariiqyada basaska ee dugsiyada xaafaddu uma baahna joogsiyo baraf ama waddooyin xilliga cimilada xun. Si loo go'aamiyo haddii dugsigaaga leeyahay wadada barafka fadlan dib u eeg shaxda bogga 6 ee dukumeentigan. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, dib u eeg websaydka Dhammaan Jadwalka iyo Waddooyinka halkan: www.pps.net/bus.

Waddooyinka barafka waxaa loo qoondayn karaa subaxda, galabnimada ama labadaba iyadoo ku xiran xaaladaha wadada. Fadlan fiiro gaar ah u yeelo maalinta oo dhan ogeysiisyada dheeraadka ah ee degmada ee ku saabsan isbedelada. Go'aamada degmada ee la gaaro wicitaanka hore ka dib waxaa loo cusboonaysiin doonaa dhammaan xarumaha warbaahinta.

Ardayda waxbarashada gaarka ah ee isticmaala basaska yaryar ama adeegyada gaadiidka gaarka ah waxaa si toos ah loogu ogeysiin doonaa boostada.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid fadlan wac ama iimayl u dir.

GAADIIDKA ARDAYDA

716 NE Marine Drive, Portland, OR 97211

503-916-6901 - Fakis: 503-916-2707

transportation@pps.net

| | |
|---|---|
| MARYSVILLE | 258 |
| MT TABOR | 257, 243 |
| RICHMOND | 257, 258 |
| RIEKE | 118, 119, 252, 267, 265, 268 |
| ROSEWAY HEIGHTS | 245 |
| SELLWOOD | 141, 143, 146 |
| SKYLINE | 136, 137, 138, 139, 140 |
| STEPHENSON | 244, 263, 270, 106 |
| WEST SYLVAN | 100, 101, 102, 103, 104, 106, 111, 112, 113, 115, 116, 120, 124, 126, 127, 132 |
| WOODMERE | 239, 245 |

*Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay aqoonsan yihiin kala duwanaanshaha iyo qiimaha dhammaan shakhsiyaadka iyo kooxaha iyo doorkooda bulshada. Dhammaan shakhsiyaadka iyo kooxaha waa in loola dhaqmaa si caddaalad ah dhammaan hawlaha iyo barnaamijyada, iyada oo aan loo eegin da'da, midabka, caqiidada, naafanimada, xaaladda guurka, asalka qaran, jinsiyadda, diinta, jinsiga ama nooca galmada. Sharciga Guddiga Waxbarashada 1.80.020-P*

| Dugsiga leh Wadada (ama Wadooyinka) Barafka | Wadooyinka leh Isbadalalada Cimilada Xun |
|---|---|
| ABERNETHY | 243, 245 |
| ACCESS | 105, 260, 280, 282, 287 |
| AINSWORTH | 100, 103, 107, 109, 111, 112, 113, 145 |
| ATKINSON | 247 |
| BENSON | 219, 228, 240 |
| BRIDLEMILE | 104, 114, 115, 116, 117, 141 |
| CAPITOL HILL | 268, 272, 274, 275, 105, 117 |
| CHAPMAN | 102, 124 |
| FOREST PARK | 126, 127, 132 |
| GLENCOE | 243, 245, 240 |
| GRAY | 109, 118, 142, 147, 265, 268, 272, 275, 119 |
| GROUT | 228 |
| HAYHURST | 118, 119, 120 |
| HOSFORD | 243 |
| JACKSON | 107, 114, 144, 148, 237, 244, 261, 263, 264, 266, 267, 270, 274, 117, 262 |
| KELLOGG | 219, 228, 258 |
| KELLY | 239, 256 |
| LANE | 239, 258, 256 |
| LENT | 256 |
| LINCOLN | 141, 142, 143, 144, 145, 146, 147, 148 |
| MAPLEWOOD | 261, 265, 266, 267, 262 |
| MARKHAM | 117, 237, 262, 264, 274, 261, 266, 270 |



| Fariinta Warbaahinta | Fariinta Qeexay |
|---|---|
| PPS Furitaanka Caadiga ah. Dugsiyada gaarka ah oo ku yaal waddooyinka barafka | • Ardayda waxay yimaadaan wakhtiga caadiga ah<br>• Dhammaan dhismayaasha PPS way furan yihiin<br>• Adeegga baska ee dugsiyada gaarka ah ee waddooyinka barafka.<br>• Barnaamijyada Iskuullada ka dib iyo barnaamijyada maalinta la dheeree-yey waxay shaqeeyaan gaadiid la'aan. |
| Dugsiyada gaarka ah ee PPS ama dhammaan dugsiyada PPS waxay furmaan laba saacadood oo dambe. Basaska waa laga yaabaa inay ku socdaan ama inaysan ku socon wad-dooyinka barafka | • Ardayda dhigata dugsiyada gaarka ah ama dhammaan waxay yimaadaan laba (2) saacadood ka dib markii caadiga ah<br>• Dhammaan dhismayaasha PPS way furan yihiin<br>• Haddii lagu dhawaaqo, dhammaan basaska waxay ku socdaan waddooyin-ka barafka, haddii kale basasku waxay u socon doonaan sidii caadiga ahayd, laba saacadood uun ka dib.<br>• Xanaanada-ilmaha dugsiga kahor waa la joojiyay.<br>• Dugsiga xanaanada (Kindergarten) subaxdii waa la joojiyay.<br>• Dugsiga SUN fasalada subaxdii waa la joojiyay.<br>• Fasallada galabtii oo maalin nuskeed(half-day) iyo maalin dhexe(mid-day) waxay shaqeeyaan gaadiid la'aan dugsiga.<br>• Barnaamijyada Iskuullada ka dib iyo barnaamijyada maalinta la dheeree-yey waxay shaqeeyaan gaadiid la'aan. |
| Dugsiyada gaarka ah ee PPS waa la xiray. Dhammaan basaska waxay ku socdaan waddooyinka barafka. | • Ardayda dugsiyada gaarka ah waxay joogi doonaan guriga.<br>• Dhismayaal dugsiyada oo gaar ah ayaa la xiray.<br>• Dhammaan basaska waxay ku socdaan waddooyinka barafka<br>• Barnaamijyada Iskuullada ka dib iyo barnaamijyada maalinta la dheeree-yey ee dugsiyada furan waxay shaqeeyaan gaadiid la'aan |
| Dugsiyada gaarka ah ee PPS waa la xiray. | • Ardayda dugsiyada gaarka ah waxay joogi doonaan guriga.<br>• Dhismayaal dugsiyada oo gaar ah ayaa la xiray. |
| Dugsiyada PPS way xiran yihiin. Xafiisyada waa furan yihiin. | • Ardayda waxay joogi doonaan guriga.<br>• Dhammaan dhismayaasha dugsiga waa la xiray.<br>• Xafiiska dhexe waa furan yahay.<br>• Rice waa furan yahay.<br>• Gaadiidka waa furan yahay. |
| Dhammaan PPS waa la xiray | • Ardayda waxay joogi doonaan guriga.<br>• Dhammaan dhismayaasha dugsiga waa la xiray.<br>• Xafiiska waa la xiray. |
| Hawlaha iyo dhacdooyinka fiidkii PPS waa la joojiyay. | • Dhammaan hawlaha, dhacdooyinka, iyo tababarada lagu qabto fiidkii xarumaha PPS waa la joojiyay. |

Ogeysiinta Cimilada Xun iyo Nidaamyada

Helitaanka Wararka Degdegga ah - Si Dhakhso ah

PPS waxay ka shaqeysaa inay si degdeg oo cad ah u dirto qoysaska ogeysiisyada xiritaanka ama dib u dhigista. Marka laga soo tago ogeysiinta warbaahinta, waxaan isticmaalnaa:

**Taleefoonka tooska ah:** Wicitaanada taleefoon ee Ingiriisida iyo luqadaha la taageeray nambarka taleefoonka aasaasiga ah ee ku qoran foomka diiwaangelinta ardaydaada. Waxaad bedeli kartaa nambarka taleefoonka adiga oo la xiriiraya xoghayaha dugsigaaga.

**Ku dhajinta onlaynka:** Gudaha "Alert Pod" ee www. pps.net iyo dhammaan websaydka dugsiga.

**Twitter:** Nala soco @PPSConnect

**Facebook:** Noo saar "like" halkan www.facebook.com/pps.homepage

Fariin qoraaleed: Isku qor Fariimaha Dugsiga adoo fariinta "HAA" u diraya 68453

**Macluumaadka Cimilada Xun**

**Badbaadada ayaa ah midda ugu muhiimsan marka lagu jiro xaaladaha cimilada xun.**

**Joogsi kasta oo bas iyo dariiqa la maro dib ayaa loo eegay si loo go'aamiyo haddii joogsi barafka kale ama waddo loo baahan yahay. Xaaladaha qaarkood, waddooyinka caadiga ah waa la beddelay ama waqtiyo wax laga beddelay maalmaha barafka. Fadlan xaqiiji waddooyinkaaga barafka ee la cusboonaysiiyay, iyo sidoo kale waddooyinka caadiga ah iyo waqtiyada halkan: www.pps.net/bus**

Waxyaabaha aad u baahan tahay inaad ogaato:

- Ku dhawaaqida waddooyinka barafka waxaa la socon kara 2-saacadood furitaan daahsan ama xiritaan hore. Waqtiyada basaska waxay la socon doonaan bilawga dambe ama qaadida hore ee dugsiga si waafaqsan.
- Ardayda waa inay basaska ku sugaan masaafo badbaado leh oo wadada u jirta inta lagu jiro xaaladaha cimilada xun.
- Wakhtiyada joogsiga saxda ah ma suurtowdo maalmaha barafka sababtoo ah daahitaanka gaadiidka ee aan la saadaalin karin, markaa ardaydu waa inay goor hore joogaan joogsada barafka



- Ardayda waa inay xirtaan dhar diiran oo ay u diyaar garoobaan wakhti dheer oo sugitaanka banaanka ah maalmahan.
- Waalidiinta ayaa mas'uul ka ah badbaadada ardayda ku sugan joogsiyada baska waana inay u sheegaan ardaydooda habka socodka iyo sugitaanka badbaadada leh ..
- Basaska waxay leeyihiin raadiyowyo waxayna ku qalabaysan yihiin taayirrada cimilada oo dhan iyo silsilado.
- Isticmaal biraha gacanta markaad fuulayso ama ka degayso baska si aad uga hortagto inaad simbiriirixato.
- Ha istaagin hana ku ciyaarin meelaha barafka ah ee joogsiga baska. Ha tuurin kubbadaha barafka.
- Weligaa ha isku dayin inaad ka soo baxsato wax baska agtiisa ama hoostiisa ku dhacay. Taa beddelkeeda, u sheeg dhacdadan oo kale darawalka.
- Weligaa ha ka daba tegin baska ama ha isku dayin inaad qabsato bambarka dambe.

**Dugsiyada leh Waddooyinka Barafka**

Haddii aad maqasho ogeysiis ah in PPS ay ku socoto waddooyinka barafka, isticmaal jadwalka soo socda si aad u go'aamiso haddii waddadaada caadiga ahi uu leeyahay waddo baraf kale ah iyo joogsiyo bas la xiriira. Jadwalka ku yaal bogga xiga waxaa habeeya Iskuulka iyo Nambarada Wadada.

Haddii aadan arkin dugsigaaga oo liiska ku jira ama nambarka waddadaada, waxay la macno tahay in baskaaga uu socon doono jadwalkiisa caadiga ah iyo joogsiga.

Haddii magaca dugsigaaga hoostiisa aad ku aragto nambarkaaga waddada caadiga ah, markaa waxaad leedahay wadada barafka iyo joogsi. Booqo www.pps.net/bus si aad u aragto faahfaahinta wadada barafka**.**

**Haddii aad leedahay Wadada Barafka markaa fadlan xaqiiji wakhtiyada wadada barafka iyo goobta joogsiga websaydka PPS: www.pps.net/bus. Wadooyinka barafka waxaa laga yaabaa inay lahaadaan goobo joogsi iyo waqtiyo kala duwan maadaama dhammaan joogsiyada aan la adeegsan karin xilliga cimilada xun.**